MAHABOONTAHY IN NIDAAMKA SAAXIBADA MAXKAMADDA LAGU SOO BIIRIYO NIDAAMKA GARSOORKA SOOMAALIYA?

TUSMO

1- GOGOLDHIG

2- QEEXIDDA ARAGTIDA SAAXIBADA MAXKAMADDA.

3- FAA'IIDOOYINKA IYO CEEBAHA UU LEEYAHAY NIDAAMKA SAAXIBADA MAXKAMADDU.

4- ARAGTIDA SAAXIBADA MAXKAMADDA EE NIDAAMYADA QAANUUNEED EE KALA DUWAN.

5- QAANUUNKA DAWLIGA AH IYO ARAGTIDA SAAXIBADA MAXKAMADDA.

6- ILAA INTEE HABOONTAHAY IN NIDAAMKA SAAXIBADA MAXKAMADDA LAGU SOO BIIRIYO NIDAAMKA GARSOORKA SOOMAALIYA?

7- GUNAANAD

GOGOLDHIG

Waxaa jira nidaam loo yaqaanno Nidaamka saaxibada Maxkamadda**"Amicus *curiae*"** oo badanaa in muddo ah laga isticmaalaayay Maxkamadaha wadamada ku dhaqmo hannaanka sharci ee loo yaqaano Comman Law, xiligaan casriga ahna si tartiib tartiib ah ugu soo biiraaya habraacyada Maxkamadaha wadamada ku dhaqmo nidaamka sharci ee loo yaqaanno Civil Law.

Nidaamka saaxiabada Maxkamaddu waa nidaam u suurtagelinaaya qof ama koox ka qaybgalka dacwad ka socoto Maxkamadda oo aysan ka ahayn daraf asal ah, Dacwoode ama Dacweysane, Racfaanle ama Racfaansane, Soo Cabte ama laga soo cabte, sidoo kalana aan ahayn soo dhexgale dan gaar ah ka leh ka qaybgalka dacwadda, saaxiabada Maxkamaddu aalaaba waxay dacwadda uga qaybgalaan si ay Maxkamadda uga kaalmeeyaan soo saarida go'aan cadaaladeed iyo sidoo kale in ay difaacaan Maslaxada guud.

Haddii si kale loo dhaho saaxibada Maxkamaddu waxay Maxkamadda u gudbiyaan inta uu socdo habraaca dacwad qaadistu macluumaad la xiriira dhacdooyinka la isku haayo iyo aragti sharci oo la xiriirta dacwadda Maxkamadda hortaalla, xogtaas oo ka kaalmaynaysa Maxkamaddu in ay gaarto go'aan ku dhisan cadaalad.

Saaxibada Maxkamaddu waxay noqon karaan shaqsiyaad caadi ah sidoo kalane waxay noqon karaan kooxo abaabulan sida bulshada rayidka, difaacayaasha xuquuqda aadanaha, ururada garyqaannada, kooxa u doodo dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa kale, mowduucyada aalaaba ay soo dhexgali karaan saaxiabada Maxkamaddu waxaa ka mid ah arrimaha aasaasiga ah ee la xiriira danta caamka sida Deegaanka, Cafimaadka guud, xuquuqda aadanaha, xuquuqda shaqaalaha, la dagaalanka musuq-maasuqa iyo siyaasadaha guud ee la xiriira arrimaha dhaqaalaha iyo bulshada.

Haddaba,haddii alle idmo, waxaan qormadaan kooban uga hadli doonnaa nidaamka saaxibada Maxkamadda oo ka kooban qaybaha soo socda:

1. Qeexidda aragtida saaxibada Maxkamadda.
2. Faa'iidooyinka iyo ceebaha uu leeyahay nidaamka saaxibada Maxkamaddu.
3. Aragtida saaxibada Maxkamadda ee nidaamyada qaanuuneed ee kala duwan.
4. Qaanuunka dawliga ah iyo aragtida saaxibada Maxkamadda.
5. Ilaa intee haboontahay in nidaamka saaxibada maxkamadda lagu soo biiriyo nidaamka garsoorka Soomaaliya.
6. Gunaanad

QEEXIDDA ARAGTIDA SAAXIBADA MAXKAMADDA

Nidaamka saaxibada Maxkamaddu waa hannaan la xiriira habraacyada Maxkamadda oo Maxkamadda dacwadda qaadaysa u suurtagalinaaya in ay ka soo qaybgaliso dacwadda ama ay u ogolaato ka soo qaybgalka dacwadda shaqsiyaad kooxo dawli ah iyo kuwo aan dawli ahaynba oo aan dacwadda dhinac ka ahayn asal ahaan isla markaane aan ahayn dhinaca dacwadda uga soo qaybgalay inuu difaacdo danihiisa gaarka ah, ujeeddada ka qaybgalka saaxibada Maxkamadda waa inay Maxkamadda ka kaalmeeyaan iftiiminta dhacdooyinka iyo fasiraada qodobada qaanuuneed ee dhacdadaas la xiriira.

Sidaan ogsoonahay hormarka Bulshada dunidu wuxuu keenayaa in bulshadu dareento muhiimadda ay leedahay ilaalinta iyo dhowridda danta caamka ah taasoo abuurtay Kooxo iyo Ururro u doodo una qareemo hormarka bulshada oo ay ka mid yihiin urrurada Mihnadlayaasha kuwaas oo u doodo ilaalinta deegaanka, kuwa u dodo dadka laga tira badan yahay iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha, Tusaale haddii Maxkamaddu qaadayso dacwad la xiriirta ilaalinta deegaanka ka sokoow dhinacyada asalka ah oo ayagu dacwadda ka leh dan gaar ah waxaa dacwadda ka soo qaybgali kara ururrada u doodo Deegaanka si ay Maxkamadda aragti uga siiyaan faa’iidada iyo ahmiyada ay leedahay ilaalinta deegaanka sidoo kalane Maxkamadda u iftiimiyaan dhibaatooyinka ay leedahay xaalufinta deegaanka, sida muuqata kooxdaan iyadu ma’aha daraf asal ah oo dacwadda dan gaar ah ka leh ama soo dhexgale doonaayo in uu difaacdo danihiisa gaarka ah, hase ahaatee sababta ay dacwada uga soo qaybgalaayaan waa in ay difaacaan danta caamka ah iyo in ay Maxkamadda u iftiimiyaan aragtiyo muhiim ah oo la xiriira ahmiyada ilaalinta deegaanka oo laga yaabo in dhinacyada asalka ah ee dacwaddu aysan soo qaadin maadaama ayagu ay difaacayaan danahooda gaarka ah.

Haddii, arrintaas aan sii iftiimiyo Dacwaddii la xiriirtay doorashada madaxwaynaha ee 2017, oo ay gashay Maxkamadda sare ee Kenya waxaa soo codsaday inay dacwadda ugu soo qaybgalaan saaxibo maxkamadda ahaan dhawr hay'adood iyo shaqsiyaad , Maxkamaddu markay daraasaysay codsiyadaas waxa ka mid ahaa codsiyadii la aqbalay kii uu la yimid Xeer-ilaaliyaha guud ee Kenya iyo Codsigii ururka Garyaqaannada Kenya ee loo soogaabiyo LSK, waxaa la diiday Codsi uu soo jeediyay ururka dadka ku takhasusay ICT (ICT association of Kenya*).*

FAA'IIDOOYINKA IYO CEEBAHA UU LEEYAHAY HANNAANKA SAAXIBADA MAXKAMADDA

Qaybtaan haddii alle idmo, waxaan si kooban ugu xusi doonaa faa'iidooyinka iyo ceebaha uu leeyahay nidaamka saaxibada Maxkamadda, anagoo ku bilaabi doona faa'iidooyinka nidaamakan ka dibna ku xijin doonno ceebihiisa:

1. **Faa'iidooyinka hannaanka saaxibada Maxkamadda**
   Hannaanka saaxibada Maxkamaddu wuxuu leeyahay faa'iidooyin kala duwan oo muhiim u ah difaaca danaha caamka ah, faa'iidooyinkaas waxaa ka mid ah:
   a) Wuxuu dhamaystirayaa xogta Dacwadda, oo loola jeedo in uu dhamaystiraayo Macluumaadka la xiriira dhacdooyinka dacwadda iyo xeerarka khuseeya ee laga yaabo in ay dhinacyadu uga tagaan si kas ah ama si aan kas ahayn, annagoo og in dhinacyada dacwaddu aalaaba ay si qasad ah uga tagaan arrimo muhiim ah oo dacwadda la xirrira oo ay u arkaan in sheegistoodu aysan dan ugu jirin, sidaasne saaxibada Maxkamadda ee ka soo qaybgalay dacwadda si ay u difaacaan danta

guud waxay buuxiyaan ama dhamaystiraan meelo muhiim ah oo ay ka tageen dhinacyada dacwaddu.

b) Nidaamka saaxibada maxkamaddu wuxuu xooga saaraa ilaalinta danaha caamka ah oo dhinacyadu aysan xooga saarin ama ay ka tageen maadaama dhinacyada asalka ay difaacayaan kaliya dano gaar ah.

c) Badanaa saaxibada Maxkamaddu ee ka soo qaybgalaaya dacwadda waa kuwo si gaar ah uga shaqeeyo mowduuca dacwadda ama ayagu takhasus gaar ah u leh oo haayo xog iyo macluumaad ay yar tahay cid kale oo hayso sidaa awgeedna waxay maxkamadda siiyaan macluumaad dheeri ah oo la xiriira mowduuca dacwadda macluumaadkaas oo sifiican maxkamadda uga kaalmayn kara gaaridda go'aan sax ah.

2. **Ceebaha nidaamka saaxibada Maxkamadda**

Nidaamka saaxiabada Maxkamadda wuxuu leeyahay ceebo kala duwan oo ay ka mid yihiin kuwaan hoos ku qoran;

a) Nidaamaka saaxibada Maxakamaddu wuxuu soo kordhinayaa culays la xiriira kharash iyo waqti, dad badan ayaa waxa ay ku doodeen in nidaamkani uu soo kordhinaayo culays dhinaca kharash iyo waqti ah.

b) Nidaamkaan wuxuu wiiqi karaa istaraatiijiyada difaaca ee dhinacyada dacwadda sidoo kalane wuxuu soo kordhin karaa caddaymo cusub, waxaa kale oo uu keeni karaa xaqaa'iq iyo caddaymo ka qayb qaata wax ka badalidda habka socodka dacwadda.

c) Sidoo kale dadka nidaamkan dhaliilo waxay sheegeen in uu dhibaato usoo jiidi karo dhinacyada dacwadda midkood, sidoo kalane sababi kara natiijo ah wax u dhimadda mabda'a u sinaanta cadaaladda horteeda, "Tusaale Garsoore ka tirsan Maxkamdda sare ee USA oo lagu magacaabo JUSTICE ANOTIN SCALIA ayaa sheegay in dacwadii u dhaxaysay JAFEE V. RDMOND oo ay gashay Maxkamadda sare ee USA sanadkii 1999 in saaxibada Maxkamaddu ay soo gudbiyee 14 qoraal oo kala duwan hase ahaatee dhammaantood ay u daneenaayeen dacwaysanaha lana waayay hal dukumiinti oo ay soo gudbiyeen saaxibada Maxkamaddu oo u danaynaaya dacwoodaha.

ARAGTIDA SAAXIBADA MAXKAMADDA EE NIDAAMYADA QAANUUNEED EE KALA DUWAN

Haddii alle idmo, qaybtaan waxaan uga hadli doonnaa aragtida nidaamka saaxibadda Maxkamadda ee nidaamyada qaanuuneed ee kala duwan annagoo xooga saari doono labada nidaam qaanuuneed ee dunida ugu waawayn sida nidaamka qaanuuneed ee loo yaqaanno Comman Law iyo nidaamka qaanuuneed ee loo yaqaanno Civil Law.

a) **Nidaamka saaxibadda Maxkamadda iyo hannaanka qaanuuneed ee loo yaqaanno Comman Law**

Badanaa wadamada isticmaalo nidaam qaanuuneedka loo yaqaano Comman law waxay ogolyihiin in saaxibada Maxkamaddu ay ka qaybgalaan dacwadaha taabanaaya maslaxada guud.

Wadamada Australia iyo Kenya waxay ogolyihiin in saaxibada Maxkamaddu ay ka soo qaybgalaan dacwadda taabanaysa danaha caamka ah halka wadamada Ingariiska iyo Canada ay Maxkamaddu si iskeed ah u

farayso saaxibadda Maxkamadda in ay ka soo qaybgalaan Maxkamadda soona gudbiyaan qoraallo ay ku muujinayaan aragtidooda, halka Maxkamadaha USA ay ku bilawdeen in ay ka soo qaybgalka dacwadda u ogolaadaan hal qof oo mowduuca dacwadda aqoon u leh ama ka shaqeeya kadibna si tartiib tartiib ah ayay u bilaabeen in ay kooxo iyo ururro u ogolaadaan ka qaybgalka dacwadaha taabanaayo danta caamka ah.

Si guud marka aan u eegno dhammaan wadamada ku dhaqmo nidaamka qaanuuneedka loo yaqaano Comman Law way ogol yihiin hannaanka saaxibada Maxkamaddu ay uga qaaybgalaayaan dacwadaha si ay u difaacaan danaha caamka ah.

b) **Nidaamka saaxibadda Maxkamadda iyo hanaanka qaanuuneed ee loo yaqaano Civil Law.**

si ka duwan sidii aan horay ku soo tilmaamnay wadamada isticmaalo nidaam qaanuuneedka loo yaqaano Civil Law-ga caado uma ahayn in Maxkamaduhu ka qaybgalka dacwadda u ogolaadaan shaqsi aan dacwadda ka lahayn dan gaar ah oo toos ah, hasa yeeshee aragtidaas si tartiib tartiib ah ayay isku badashay oo maanta wadamo fara badan oo civil law ah ayaa qaatay nidaamka saaxibada Maxakamadda, wadamadaas waxaa ka mid ah Brazil oo nidaamkeeda Maxkamadda dastuuriga ee soo baxay 1999 uu ogol yahay in saaxibada Maxkamaddu ay ka qaybgali karaan dacwadaha ay galayso Maxkamadda dastuuriga ah, wadamada kale ee ogol waxaa ka mid ah Argentina, Mexico, Poland iyo Peru.

Nidaamka France oo ka mid ah hormuudka wadamada ku dhaqmo Civil Law-ga ayaa isagana si tartiib tartiib ah maxkamadahiisu u ogolaanayaan hanaanka saaxibada Maxkamadda.

si guud waxaa la dhihi karaa hannaanka saaxibada Maxkamaddu uga qaybgalayaan dacwadaha la xiriira maslaxada guud iyo danaha caamka wuxuu ka soo bilowday wadamada isticmaalo nidaam qaanuuneedka loo yaqaano Comman Law ka dibna wuxuu si tartiib tartiib ah ugu fiday wadamada ku dhaqmo nidaam qaanuuneedka kale ee loo yaqaano Civil Law.

QAANUUNKA DAWLIGA AH IYO ARAGTIDA SAAXIBADA MAXKAMADDA

Isticmaalka saaxibada Maxkamaddu wuxuu aad ugu faafay garsoorka caalamiga ah haddii uu ahaan lahaa Maxkamadaha caalamiga ee caadiga ah iyo kuwa la xiriira taxkiimka maalgashiga caalamiga ah tusaale ahaan Maxkamadda caddaalada aduunka waxaa caada u ah in ay aqbasho qoraallada iyo ka qaybgalka saaxibada Maxkamadda ee ka baxsan dhinacyada dacwadad caadiga ah mararka qaarne ayada ayaaba u yeerato saaxibada maxkamadda si ay aragti uga siiyaan mowduuc gaar ah.

Tirsiga 2aad ee qodobka 34aad ee xeerka lagu dhisay Maxkamadda Caddaalada aduunka ayaa ogolaanaaya in hay’adaha caalamiga ah ay Maxkamadda u soo gudbin karaan qoraallo la xiriira dacwad Maxkmadda hortaallo qoraaladaas oo ujeeddadoodu tahay in ay Maxkamadda u ifiyaan arrimo la xiriira dhacdooyinka

iyo qaanuunkaba. Maxkamadaha midowga Yururb ayaa iyana isticmaalo saaxibada Maxkamadda sida Maxkamadda Cadaalada ee Yururb.

Maxkamadaha caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo kuwa dambiyada ayaa iyaguna ogol in saaxibada Maxkamaddu ka soo qaybgalaan dacwad hortaalo Maxkamadahaas sida Maxkamadda Yururb ee xuquuql insaanka iyo Maxkamadda dambiyada Calaamiga ah, dhammaantood waxay ogolyihiin in saaxibadu Maxkamaddu ay dacwadu ka soo qaybgalaan si Maxkamaddu ay gacan uga siiyaan.

Si taa la mid ah Maxkamadaha caalimiga ah ee dhaqaalaha aduunka iyo taxkiimka ee khuseeya maalgashiga caalamiga ah iyo hay'adaha kale ee ayagu leh hannaan garnaqsi badankood waxa ay ogolyihiin ka qaybgalka saaxibada Maxkamadda xiliga uu soo socdo garnaqsigu.

ILAA INTEE HABOON TAHAY IN NIDAAMKA SAAXIBADA MAXKAMADDA LAGU SOO BIIRIYO NIDAAMKA GARSOORKA SOOMAALIYA?

Sidaan ogsoonahay hannaanka garnaqsiga ee Soomaaliya wuxuu ku salaysan yahay in aan la aqbalin dacwad shaqsiga dacwoonaaya uusan ku qabin dan gaar ah oo toos ah sida ay jideenayaan qodobada53aad iyo 68aad ee xeerka habka Madaniga, hase yeeshee mabda'aas wuxuu ku socdaa in uu si tartiib tartiib ah isu badalo kadib markii lagu qarriray Dstuurka Federaalka Soomaaliya inay jiri karaan Dacwado qofku uu Maxkamadda ka furi karo isaga oo aan ku qabin dan gaar ah, ujeeddada uu dacwadaas u furaayana ay tahay difaacida dan caam ah, tusaale ahaan tirsiga 3aad qodobka 39aad ee DFKMG, wuxuu u qoron yahay sidaan (**qof ama urur kastaa wuu tagi karaa Maxkamad, si uu u difaaco xuquuqda dad kale ee aan awoodin in ay iskood isku difaacaan**), si

taa la mid ah mabda’aas waxaa mar kale lagu qarriray xeerka lagu dhisay Maxkamadda Dastuurka ee xeer Lr.23 soona baxay 27/06/2016, gaar ahaan qod.20aad oo qeexaaya in ay jiri karaan dacwado dastuuri ah oo la xiriira dan caam ah oo ay Maxkamadda usoo gudbin karaan qof kasta ama koox kasta ayada oo aysan shardi ahayn in cidda dacwadda soo gudbinaysa ay ku qabto dan gaar ah oo toos ah hasa yeeshee ay u banaan tahay in ay difaacdo dan caam ah.

Halkaas waxaa nooga muuqanaaya in mabda’ii hore ee shardi ka dhigaayay in cidda dacwadda furanaysa ama iska difaacaysa ay ku qabto dan gaar ah oo toos ah, uu si tartiib tartiib ah meesha uga baxaayo oo uu badalaayo mabda’a ah in qof kasta ama koox kasta ay Maxkamadda gayn karaan dacwad si ay u difaacaan dan caam ah.

Markaan u nimaado ka qaybgalka saaxibada Maxkamadda ee dacwadaha ka socdo Maxkamadda ee khuseeya dhinacyo kale waxaan soo qaadan karnaa qod.27aad ee xeerka lagu dhisay Maxkamadda Dastuurka xeer Lr.23 oo qeexaaya in dacwadaha dastuuriga ah gaar ahaan kuwa ku saabsan duridda sharciga lagu duraayo waafaqsanaan la’aanta dastuurka ay ka soo qaybgalayaan garyaqaanka guud ee dawladda iyo xeer-ilaaliayah guud ee qaranka ka sukoow dhinacyadii asalka ahaa ee dacwaddu khusayso iyo qareenadooda.

Arrimahaan waxay natusinayaan in nidaamka saaxibada Maxkamaddu uu sal ku leeyahay shuruucda dalka gaar ahaan kuwa la xiriira habka qaadista dacwadaha dastuuriga ah hasa ahaatee uu u baahan yahay hormarin iyo in habraacyo loo sameeyo Maxkamaduhuna ay hirgaliyaan.

GUNAANAD

Nidaamka saaxibada Maxkamaddu waa nidaam muhiim u ah qaadista dacwadaha si toos ah u taabanaayo danta caamka ah gaar ahaan dacwadaha idaariga, ciqaabta iyo dastuuriga, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa arrimahaan soo socda:

1. In mabaad'ida ku saabsan ka qaybgalka saaxibada Maxkamadda ee ku jirta shuruucda dalka lagu sameeyo hormarin iyo faah-faahin.
2. In Nidaamka saaxibada Maxkamadda lagu daro habraacyada iyo nidaamyada qaanuuneed ee garsoorka dalka.
3. In saaxibada Maxkamadda loo ogolaado ka qaybgalka dacwadaha muhiimka ah ee taabanaayo xuquuqda aadanaha gaar ahaan dacwadaha idaariga iyo kuwa datuuriga

Wabillaahi Towfiiq

Tixraacyada Ugu Muhimsan

1- Dastuurka Federaalka KMG ee 2012,

2- Xeerka lagu dhisay Maxkamadda Dastuurka ee Xeer lr. 23 soona baxay 27/06/2016,

3- Bartolomeus, « The Amicus Curaie befor International Court and Tribunals, Non State Actors and International Law » Vol. 5,(2005).

4- Benjamin RD Alarie & Andrew J Green, « Interventions as the Supreme Court of Canada: Accuracy, Affiliation, and5,(2005). 5,(2005).

5- Ernst Willheim, « Access to Constitutional Justice in the High Court of Australia ». available in Bond Law Review: http://epublications.bond.edu.au/blr/vol22/iss3/10

6- Eugenia Levin, "Amicus Curiae in International Investment Arbitration:The Implications of an Increase in Third-Party Participation", Berkeley Journal of International Law (BJIL),Volume 29,Issue 1, (2011).

7- Donald R Songer & Reginald S Sheehan «Interest Group Success in the Courts: *Amicus* Participation in the Supreme Court »,

8- John Bellhouse & Anthony Lavers, The Modern Amicus Curiae: A Role in Arbitration? 23 CIV. JUST. Q. 187, 188 (2004)

9- Johannes Chan, Focus on Ma Case: Amicus Curiae and Non-Party Intervention, 27 HONG KONG L.J., (1997).

10- James F Spriggs II & Paul J Wahlbeck, « Amicus Curiae and the Role of Information at the Supreme Court », 50 Political Research Quarterly 365 (1997).

11- Paul M. Collins Jr. “Friends of the Court: Examining the Influence of Amicus Curiae Participation in U.S. Supreme Court Litigation” http://citeseerx.ist.psu.edu/viewdoc/download?doi=10.1.1.472.8484&rep=rep1&type=pdf

Qareen: Daahir Maxamed Cali